



Sebteembar 11, 2020

Ku socoto: Shaqaalaha ODDS iyo Daneeyayaasha

Ku socoto: Lilia Teninty, Agaasime, Xafiiska Adeegyada Naafooyinka  
Koboceed

Mawduuca: Ka bixitaanka dabka, COVID-19 waadna ku mahadsantahay

Cudurka faafa ee COVID-19 wuxuu dhammaanteen nagu baraarujiyay inaan dadaalka kordhino oo aan wax weyn samayno Hadda, oo ay jiraan dabka kaynta ee dhammaan Oregon, shaqada aad qabanaysid kama gaabno halyeynimo.

Guryo kooxeedka iyo Guryaha Xanaanada ah ayaa la daadgureeyay gobolka oo dhan bixiyeyaashuna waa inay noqdaan kuwo dabacsan oo hal-abuur leh si loo ogaado goobaha habboon ee daad-gureynta iyadoo la ilaalinayo taxaddarka COVID-19. Baaxadda daadgureynta ayaa abuurtay baahida loo qabo in la hagaajiyo qorshayaasha lana wareejiyo dadka naafada caqliyeed iyo koriineed qaba (I/DD) iyo in lagu jiheeyo shaqaalaha dhismayaasha maamulka, hoteelada iyo xitaa guryaha banaan ee wakaaladaha kale. Maamulayaasha kiisaska ayaa xiriir dhow la leh shakhsiyaadka ay taageerayaan. Dhamaantiin waad ku mahadsan tihiin sii wadida inaad dadka ku taageeraan qaabab hal abuur leh.

Xaaladani waa mid adag. Shaqaalaha iyo DSPs-yada waxay ku qasbanaadeen inay daadgureeyaan, qaarkood waxay la kulmeen khasaare aad u xun. Quluubteenu waxay la jirtaa midkiin kasta.

Waxaan sidoo kale doonayaa inaan hubiyo inaad aragtay hagitaanka muhiimka ah ee Maamulka Caafimaadka Oregon ee ku saabsan waxa la sameynayo haddii qofku u baahan yahay daadgurayn isla markaana uu qabo COVID-19 ama uu ku jiro karantiil ama go'doomin. Hubso inaad raacdo tilmaamahan:

<https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/le3257.pdf>

Kahor inta dabka kaynta uusan gilgilin dunideena, waxaan duubay fiidyow si aan u aqoonsado DSPs-yada iyo dhammaan shaqaalaheenna ee Toddobaadka Aqoonsiga Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah. Dareenka fiidiyowga ayaa wali sii iyadoo lagu jiro dababka kaynta. Waan ku faraxsanahay sharafna way ii tahay inaan ka mid noqdo shabakad dad leh aragti saafi ah una heellan dadka qaba Naafada ah (I/DD), iyo midba midka kale. Waxaan rajeynayaa inaad waqti sii doontid [daawashada muuqaalka](#).

Bad-qab ahaw. Amaan noqo

Daacadnimo,



Lilia Teninty

Agaasime

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Kobaca (ODDS)

*Fariimaha Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo booqo websaytkayaga.*

Waxaad ku heli kartaa dokumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka camoolka ama qaabka aad doorbidi. Kala xiriir Xafiiska Oregon ee Adeegyada Naafuoyinka Koboceed 503-945-5811. Waxaan ka aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka dhegoolaha ah, kuwa dhegaha-indhaha la', kuwa dhego culus ama leh naafo xagga hadalka ah. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan

bixiyayaasha adeega qadka booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).